

JAMHUURIYADDA		SOMALILAND
<b>FAAFINTA RASMIGA AH</b>		
SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE	الْجُمْهُورِيَّةُ الصُّومَالِيَّةُ	
XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL, HARGEYSA E-mail: <a href="mailto:Garyaqaankaquud@gmail.com">Garyaqaankaquud@gmail.com</a>		
Sanadka: 3aad	Cadadka: 6aad ee June	Taariikh: 05/07/2014
QIIMAHA CADADKA: SL. Sh.		
RUKUNKA (Subscription):		
QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii Boggii kastaaba SL. Sh.		

**TUSMADA CADADKA**

<p><b><u>QAYBTA KOWAAD:</u> XEERARKA BAARLAMAANKA IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA:</b></p> <p>1) SOOMA BIXIN</p> <p><b><u>QAYBTA LABAAD:</u> XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO DIKREETOYINKA MADAXWEYNAHA:</b></p> <p>2) <u>XEER MADAXWEYNE</u> Lr: 0401/062014 Xeer-Nidaamiyaha Diiwaangelinta Muwaadiniinta</p>	149
---	-----

**QAYBTA SADEXAAD: DIGREETOYINKA,**

**WAREEGTOOYINKA, AMARADA & XEER**

**NIDAAMIYAYAASHA WASIIRADA, IWM**

- 3) Wareegto Wasaaradda Hawlaha guud Guriyanta iyo Gadiidka; Mamnuucid soo dejinta basaska albaabada bidixda ku leh.

161

**QAYBTA AFRAAD: AMARADA &**

**GO'AANADA MAAMUL**

- 4) Amar Xayiraad; Maxkamada Gobolka Hargeysa,

165

- 5) Baafin Dacweysane; Maxkamada Degmada Hargeysa,

168

- 6) Baafin Xukun; Maxkamada Degmada Hargeysa,

169

- 7) Cadeyn Diiwaan Gelin Shirikada SOMHORIZONE, Xafiiska Xeer Illaalinta Guud

171

- 8) Diiwaan Gelin Ivory International, Xafiiska Xeer Illaalinta Guud

173

- 9) Diiwaan Gelin Shirikada Berberaawi Company, Xafiiska Xeer Illaalinta Guud

174

- 10) Diiwaan Gelin Shirikada Byouth Fusion Resources, Xafiiska Xeer Illaalinta Guud

176

- 11) Diiwaan Gelin Shirikada Nuurs Construction Company, Xafiiska Xeer Illaalinta Guud

178

- 12) Diiwaan Gelin Shirikada Giireh Genestone and Mineral Company, Xafiiska Xeer Illaalinta Guud


179

- 13) Diiwaan Gelin Shirikada Tartiib General Trading Company, Xafiiska Xeer Illaalinta Guud

181

14) Diiwaan Gelin Shirikada Miisaan  
Healthcare Company, Xafiiska Xeer  
Illaalinta Guud

15) Cadeyn Diiwaan Gelin Shirikada  
Global Limited (CTG), Xafiiska Xeer  
Illaalinta Guud



**QAYBTA SHANAAD: OGEYSIISYADA**

16) SOOMA BIXIN

**QAYBTA LABAAD:**

**XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO**

**DIKREETOYINKA MADAXWEYNAHA:**

**REPUBLIC OF  SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-2560/062014

DATE ... 08/06/14

**XEER MADAXWEYNE Lr:0401/062014**

**Xeer-Nidaamiyaha Diiwaangelinta**

**Muwaadiniinta**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**Qaybta 1aad**

**Xubinta 1aad**

## Mabaadii'da Guud



### Qodobka 1aad Eray Bixin

- Muwaadin:** Waxa looga jeedaa qofka ka isiran dadkii deganaa geyiga Somaliland 26-kii bishii 6-aad 1960-kii iyo wixii ka horeeyey iyo qofka sifo sharci ah lagu siiyey Jinsiyada Somaliland.
- Wasiir:** Waxaa looga jeedaa Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha.
- Madaxweyne:** Waxaa looga jeedaa Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland.
- Wasaaradda:** Waxaa looga jeedaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha.
- Diiwaangelin:** Waxaa looga jeedaa habka lagu uruurinayo xogta muwaadiniinta ee lagu gelinayo isla markaana lagu kaydinayo Diiwaanka Qaranka oo ay meel-

marinayso Wasaaradda  
Arrimaha Guduhu.



**Diiwaanka Qaranka:**

Waxaa looga jeedaa diiwaan lagu kaydiyo dhammaan magacyada muwaadiniinta la diiwaangeliyey.

**Xog:**

Waxaa looga jeedaa macluumaadka laga qoro qofka ee ku xusan Qodobka 11aad ee Xeerkan.

**Foomka Diiwaangelinta:**

Waxaa looga jeedaa waraaqda ku xusan Qodobka 11aad ee Xeerkan ee lagu qorayo xogta muwaadinka.

**Qodobka 2aad**

**Dhaqan-gelinta Diiwaanka Qaranka ee Muwaadiniinta**

Waxa Xeer-nidaamiyahan lagu dhaqan-geliyey Diiwaanka Qaranka ee Muwaadiniinta kaas oo looga gol-leeyahay in:

- A. Lagu diiwaan-geliyo muwaaddin kasta oo gaadhay da'da 16 jir.
- B. Uu noqdo meel lagu kaydiyo isla markaana lagu xafido xogaha laga qoro muwaaddinka.

**Qodobka 3aad**

## **Lahaanshaha Diiwaanka**

Diiwaanku waa hanti qaran, waxaana uga masuul ah Wasaaradda Arrimaha Gudaha.



### **Qodobka 4aad**

#### **Dadka Xaqqa U Leh in la Diiwaangeliyo**

Waxaa xaq u leh in la diiwaangeliyo muwaadin kasta oo gaadhay da'da Lix iyo Toban jir.

### **Qodobka 5aad**

#### **Ansixinta Diiwaangelinta**

Wasaaradda Arrimaha Gudaha ayaa u xilsaaran ansixinta Diiwaan-gelinta Muwaadiniinta ee goob kasta.

### **Qodobka 6aad**

#### **Ilaalinta Xogta la Diiwaangelinta**

Waxaa reebban:


1. In xogta muwaadiniinta dalka laga saaro.
2. In aan daaha looga qaadin cid aan xeer awood u siin.
3. In wax laga beddelo hadaan ogolaanshiyo laga helin cidda ka mas'uulka ah.

### **Qodobka 7aad**

#### **Daabacaadda iyo Xarunta Diiwaanka**

1. Wasaaradda Arrimaha Gudaha ayaa ka masuul ah habaynta, dhaqan-gelinta iyo daabacaadda diiwaanka muwaadiniinta.

2. Diiwaanka guud waxa lagu haynayaa Xarunta Wasaaradda Arrimaha Gudaha, waxaana maamuli doona waax gaar ah oo uu madax ka yahay mas'uulka diiwaanka oo uu magacaabay Wasiirka Arrimaha Guduhu.



### **Qodobka 8aad**

### **Sugitaanka Muwaadinka**

Sugitaanka muwaadinka waxaa loo raacaya sidan soo socota:

1. Qof kasta oo raba in uu is diiwaan-geliyo waxaa xaqiijinaya Caaqilka, waxaana ansixinaya Wakiilka Maxkamadda ee Goobta ka dib markuu sidaa ku dhaariyo Caaqilka.
2. Marka ay sugnaato Muwaadinnimada qofka is diiwaangelinaya, waxa mas'uulka Goobtu xogta muwaadinka gelinaya foomka rasmiga ah ee Diwangelinta.

### **Qodobka 9aad**

### **Foomka Diwaangelinta**

Foomka diiwaan-gelinta ayaa sal-dhig u noqonaya diiwaan-gelinta Muwaadinka, iyada oo dhammaystiran ayuunbaa la gelin karaa diiwaanka.

Foomka Diiwaan-gelinta waxa lagu qorayaa xogaha hoos ku qoran ee muwaadinka:-

1. Magaca qofka oo afaran.
2. Taariikhda dhalashada iyo goobtiisa dhalashada.
3. Lab/dhedig midkuu yahay.

4. Sawirka qofka.
5. Lambarka taxanaha ah ee Warqadda Aqoonsiga.
6. Taariikhda uu dhacayo.
7. Deegaankiisa.
8. Tix-raaciisa Lambar.
9. Taariikhda la bixiyey.
10. Ciwaanka qofka.
11. Mihnadiisa.
12. Faraha ama Isha.
13. Sawirka wejiga ee qofka.
14. Saxeexa soo saaraha.
15. Saxeexa Muwaadinka.



### **Xubinta 2aad**

### **Qodobka 10aad** **Goobta Diiwaangelinta**

Waxa la cayimayaa Goobo Diiwaangelined, waxaana la dejinayaa nidaam lagu kala garto goobaha iyada oo la siinayo Degmo kasta tirsi lambar oo u gaar ah.

### **Qodobka 11aad** **Hawl-galka Diiwaangelinta**

Bilawga hawl-galka diiwaangelinta Muwaadiniinta waxa sal-dhig u ah qoddobadan soo socda oo ay waajib tahay in la dhammaystiro.

In loo raaco Diiwaangelinta heerarkan ama jaranjarooyinkan:



1. Marka diiwaan-gelinta la sammaynayo waa in la sugo Muwaadinnimada Qofka Somalilanderka ah.
2. Marka ay sugnaato Muwaadinnimada qofka is diiwaangelinayaa, waxa la gelinayaa xogtiisa form-ka rasmiga ah.
3. Waxa isla goobtaasi lagu siinaya qof kasta oo ay sugnaato muwaadinnimadiisu warqad aqoonsi oo ku-meel gaadh ah.
4. Qofkasta oo ku guuldaraysta in uu sugo Muwaadinnimadiisa waxa lagu war-gelinayaa in uu keeno qof la yaqaan oo Hanti ma-guurta ah ku leh Deegaanka/Dalka, oo caddeeya in uu yahay muwaadin Reer Somaliland ah, kuna dammiinto hantidiisa.

**Qodobka 12aad**  
**Nidaamka Diiwaangelinta Muwaadinka.**

Maalin kasta inta aan la furin goobta diiwaangelinta waxaa mas'uuliyiinta Goobta ku waajib ah:-

1. In ay is-xadiriyaan, islamarkaana ay saxeexaan qalabka diiwaangelinta iyagoo diiwaangelinaaya lambarka tixraaca Foom-ka Diiwaan-gelinta ee ay maalintaa ku shaqaynayaan.
2. Marka shaqo maalmeedka la soo gebagebeeyo waa in qoraal lagu cadeeyo tirada muwaaddiniinta la diiwaangeliyey maalintaa, isla markaana saxeexaan.

3. Inay diiwaan-geliyaan dhacdooyinkii ay la kulmeen.

**Qodobka 13aad**  
**Dhaqan-gelinta Diiwaangelinta**



Iyada oo la adeegsanayo dhammaan hababka warbaahinta kala duwan ee ka jira dalka:

1. Waa in la daabaco, islamarkaana la baahiyo xilliga loo cayimay Diiwaan-gelinta iyo dhammaan wixii xog ah ee ay muwaaddiniintu u baahan yihiin in ay ogaadaan.
2. Waxaa waajib ah in la baro islamarkaana lagu wacyi geliyo muwaaddiniinta muhiimadda ay Diiwaangelintu leedahay.

**Qodobka 14aad**  
**Xilka iyo Waajibaadka Mas'uuliyiinta**  
**Diiwaangelinta**

Xilka iyo waajibaadka mas'uuliyiinta Diiwaangelinta waxaa ka mid ah in:

1. Mas'uulka diiwaangelinta ee heer Degmo waxaa ku waajib ah in uu ka war bixiyo diiwaangelinta qabsoontay todobaad walba una gudbiyo Mas'uulkiisa heer Gobol xog faahfaahsan oo ku saabsan sida ay diiwaangelintu uga qabsoontay todobaadkii tagay Degmadiisa.
2. Mas'uulka heer Gobol ka dib marka uu soo uruuriyo warbixinta degmooyinka wuxuu u

gudbinayaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha  
warbixin dhamaystiran.



**Qodobka 15aad**  
**Habka Xafidaadda Qalabka Diiwaangelinta**

- 1) Hawlmaalmeedka goobta diiwaangelinta waxaa la bilaabayaa 7:00 subaxnimo, waxaanay dhammaanaysaa 6:00 galabnimo.
- 2) Haddii dib-u-dhac ku yimaado saacada furitaanka ee goobta waa in lagu caddeeyo war bixinta sababta keentay dib u dhacaas.
- 3) Haddii dib-u-dhacu aanu garawshiiyo lahayn waa in masuulka diiwaangelinta ee degmadu talaabo ka qaadaa, sidaasina uu war bixinta ku guddbiyaa.
- 4) Marka ay dhammaato hawl-maalmeedka shaqo ee diiwaangelintu dhammaan qalabka diiwaangelinta waxaa lagu haynayaa Xafiisyada Diiwaangelinta.

**Qaybta 2aad**

**Xubinta 1aad**

**Qodobka 16aad**

**Shaqaalaha Diiwaangelinta**

Si loo dhaqan-geliyo Diiwaangelinta, waa in la shaqaaleeyaa shaqaale khibrad iyo xirfad u leh dhaqan-gelinta Diiwaangelinta iyada oo inta aan qofka la shaqaalaysiin ka hor la qeexo:

1. Shuruudaha iyo xirfadaha looga baahan yahay qofka loo qaadanaayo booska uu ka hawl gelayo.
2. Habka loo raacayo xulashada Shaqaalaha; iyo
3. Waajibaadyada shaqo ee qof kasta (boos kasta) uu ku lahaanayo geeddi-socodka hawsha Diiwaangelinta.

**Qodobka 17aad**  
**Shuruudaha Shaqaalaha ka Hawlgelaya**  
**Diiwaangelinta**

Qofka loo qaadanaayo Xafiisyada kala duwan ee sugidda Muwaadinnimo Waa:

1. In uu yahay Muwaadin reer Somaliland ah.
2. In aan da'diisu ka yaraan 25 jir.
3. In uu Maskax ahaan Caafimaad qabo.
4. In aanu xukun Maxkammadeed oo kama-dambays ahi ku dhicin.
5. In uu leeyahay aqoon heer-jaamacadeed ama wax-u-dhigma.
6. Waa in uu ku sifoobaa karti, daacadnimo iyo aaminaad, Bulshada dhexdeedana sumcad ku leeyahay.

**Qodobka 18aad**  
**Reebbanaan**

Waxa reebban in ay hawsha Diiwaangelinta ka hawl galaan:

1. Qofka aanu xuskiisu dhamayn (waalan).
2. Maxaabiista Xukuman ama gar-sugayaasha ah.
3. Ajnabiga dalka gudahiisa ku sugan.
4. Qofka aan gaadhin da'da Lix iyo Toban sano.



## **Qodobka 19aad**

### **Dhaarta Hawl-wadeenada Ka-hawl-gelaya**

#### **Diiwaangelinta Muwaadinka**

Xubnaha loo magacaabay goobaha diiwaangelinta degmada iyo gobolka waxa dhaarinaya guddoomiyaha Maxkamadda Degmada (dhaar fagaare), dhaartaas oo noqonaysa sidan:

“WAXA IGU WALAAHIYA OO IGU BILAAHIYA INAAN HAWSHA DIIWAAN GELINTA U GUDAN DOONO SI XILKASNIMO IYO DAACADNIMO LEH, SHARCIGA IYO CADAALADDANA AAN KU SHAQAYNAYO”

## **Xubinta 2aad**

### **Qodobo kala Duwan**

## **Qodobka 20aad**

### **Habka Qoraalka Magacyada**

Magaca muwaadinka waa in lagu qoro xuruuf la isku wada sar-gooyey; waana in aanay kala duwanaanin xuruufta iyo qoraalka ay mas'uuliyiintu u adeegsanayaan diiwaangelinta.

## **Qodobka 21aad**

### **Saxitaanka Xogta Khaldanta**

Saxitaanka xogta khaldan waxaa loo raacayaa sidan soo socota:

1. Qof kasta oo ogaada in xogta laga qoray ee diiwaanka lagu qoray ay wax ka qaldan yihiin, waa in uu qoraal ahaan ku war geliyaa mas'uulka diiwaangelinta xogta khaldan, isla markaana ku xusaa qoraalka sida saxda ah.
2. Mas'uulka la soo gaadhsiiyey xogta khaldantay waa inuu sida ugu dhakhsaha badan u sameeyo saxitaan, warbixintana u gudbiyo mas'uulka ka sareeya.

### **Qodobka 22aad**

#### **Bixinta Warqadda aqoonsiga**

Muwaadin kasta oo is diiwaangeliyey wuxuu xaq u leeyahay in la siiyo warqadda aqoonsiga.

### **Qodobka 23aad**

#### **Reebbanaanta qaadashada Wax-ka-badan Hal**

##### **Warqad Aqoonsi**

1. Waxaa reebban in muwaadinku uu qaato wax ka badan hal warqad aqoonsi.
2. Waxaa reebban in lagu helo si khiyaamo ama been abuur ah ama lagu siiyo muwaadinka si ka baxsan Nidaamka Diiwaangelinta.
3. Qofkasta oo ku kaca falka ku xusan faqradda hore waxa lagu ciqaabi doonaa sida uu tilmaamaayo Xeerka Ciqaabtu, Hay'ad kasta oo

awood u lehna waxa uu xil ka saaran yahay inay talaabo sharci ka qaado.

4. Qof kasta oo si badheedh ah u siiya mas'uulka diiwaan-gelinaya xog qaldan, waxa uu mutaysanayaa in lagu Ciqaab mariyo sida uu dhigayo Xeerka Ciqaabtu.

**Allaa Mahad Leh,**

**Axmed Maxamed Silanyo**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

## **QAYBTA SADDEXAAD:**

**DIGREETOYINKA, WAREEGTOOYINKA,**

**AMARADA & XEER NIDAAMIYAYAASHA**

**WASIIRADA, IWM**

*Republic Of Somaliland*

*Jamhuuriyada Somaliland*

*Ministry of Public Works  
Housing & Transport*

*Wasaaradda Hawlaha Guud  
Guryeynta & Gaadiidka*

### **Xafiiska Wasiir ku xigeenka**

**Ref: WHG/G&G/XWK/278/2014**

**Date: 16/06/2014**

KU: Wasaarada Madaxtooyada

Hargeysa

KU: Wasaarada Ganacsiga iyo  
Caalamiga ah

Malgashiga

Hargeysa

KU: Wasaarada Ariimaha Gudaha Hargeysa

KU: Wasaarada Maaliyada Hargeysa

KU: Wasaarada Qorshaynta iyo Iskaashiga  
Caalamiga Hargeysa

KU: Wasaarada Warfaafinta iyo Wacyigelinta  
Hargeysa

KU: Duqa Caasimada Hargeysa Hargeysa

KU: Taliyaha Ciidanka Booliska Hargeysa

KU: Xisaabiyaha Guud ee Qaranka  
Hargeysa

KU: Hanti Dhawrka Guud ee Qaranka  
Hargeysa

KU: Shirkadaha soo dejinta Iibinta/Kiraynta  
baabuurta Hargeysa

KU: Gudida basaaska waaweyn/yar yar  
Hargeysa

KU: Hay'ada Horumarinta Wadooyinka  
Hargeysa

OG: Taliye Qaybeedyada Ciidaanka Nabadgelyada  
Wadooyinka Hargeysa

OG: Garyaqaanka Guud ee Qaranka  
Hargeysa

OG: Agaasimaha Guud ee WHG/G&Gaadiidka  
Hargeysa



OG: Wasiirka WHG/G&Gaadiidka Hargeysa  
Hargeysa

OG: Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland  
Hargeysa



**Ujeedo: Mamnuucid soo Dejinta Basaska**  
**albaabada bidixda ku leh,**

Tixraac warqada sumadeedu tahay **WHG/K/55/014** kuna Taariikhaysnayd **03-02-2014** Ujeedadeeduna ahayd mida kor ku xusan, taasoo ka bilaabmaysay 03-02-2014 kuna dhamaanaysay **04-05-2014** kadib markii ay hirgeli wayday dhamaystirka hawshaasi gaadiidka oo badan awgii, hadaba waxaan samaynay mudo kordhin laba bilood ah kana bilaabmaysa manta oo taariikhdu tahay **16-06-2014** kuna dhamanaaysa **16-08-2014**.

Maadama ay Wasaarada Hawlaha Guud Guriyeynta iyo Gaadiidku Qaranka uga masuul tahay Shuruucda Gaadiidka, waxa nagu waajib ah in aanu ilaalino shuruucda la xidhiidha gaadiidka, hadaba waxa mar labaad la idinku war gelinayaa in mudada la idiin kordhiyey aad ku fulisan qodobada hoos ku qoran:-

1. Waxa la farayaa dhamaan Macradlayaasha soo dejiya basaska albaabka bidixda ku leh iyo shaqsiyaadka sida gaarka ah uu soo iibsada inaanay soo dejin Karin wixii ka dambeeya waqtiga la siyey.

2. Waxa la faraya hantilayasha basaska albaabada bidixda ku leh inaay u bedelaan dhanka midigta mudo dhan laba bilood gudohood.
3. Sido kale waxa la ogaysiinaya dhamaan hay'adaha Dawlada inanay soo iibsan basaska albaabada bidixda ku leh, kuway hore u haysteena ka bedelaan.

Mar labaad waxaan farayaa dhamaan macradada soo dejiya baabuurta inaanay soo dejin Karin basaska alabaabka bidixda ku leh, hantiilayashuna ay ka bedelaan basaska alabaabka bidixda ku leh una bedelaan midig.

Alla Mahad Leh

Mudane: Cali Cabdi Saayaq

Wasiir ku-xigeenka WHG/G& Gaadiidka

## QAYBTA AFRAAD:

### **AMARADA & GO'AANADA MAAMUL**

Jamhuuriyadda Somaliland

Maxkamadda Gobolka Hargeysa



MG/DFL/71/2013

Date 31/05/2014

KU: Gudoomiyaha Degmada G/libaa.....Hargeysa

KU: Taliyaha Saldhiga Booliska New Hargeysa...Hargeysa

OG: Garyaqaanka Guud ee JSL..... Hargeysa

OG: Wargeysada Madax-banaan..... Hargeysa

OG: Raadiyo Hargeysa..... Hargeysa

OG: Gudoomiyaha Maxkamada Degmada..... Hargeysa

OG: Loo fuliyeyaal 9 dhintay iyo 12 qof oo dhaawacmay

Wakiil ka yihiin:


1. SH Maxamed Ibraahim Nuur
2. Maxamuud Yuusuf Odowaa
3. Maryan Cige Yuusuf
4. Maxamed Yuusuf Ceelaabe (Jicsin)
5. Iido Maxamed Cusmaan

OG: Lagu fuliyeyaal 1:- Xasan Suudi Muxumed

Masuul ka yihiin: - Aabihii Suudi Muxumed Warsame  
iyo Walaalihii

Ujeedo: Amar xayiraad (5guri) oo 4 ka mid ah ay dhaxal u heleen Ilma Muxumed Warsame ka Shanaadna uu dhex yaal u yahay Ilma Muxumed Warsame iyo Ilma

Yuusuf Warsame sida ku xusan Qaraar Maxkamada degmada ee sumadiisu tahay MDH/DFL/16/2014 Kuna taariikhaysan 8/5/2014 kuna yaal Degmada G/Libaax



Maxkamada Gobolka M/Jeex

Markay Aragtay = Galdacwadeedka fulinta ee sumadiisu iyo dhincayadiisu sare ku xusan yihiin.

Markay Aragtay = Argiga codsiga fulinta ah eek u taariikhaysan 13/05/2014 uu maxkamada usoo gudbiyeen wakiilada loo fuliyeyaashu.

Markay Aragtay Xukunka Maxkamada Sare ee sumadiisu tahay MS/8/097 KUNA TAARIIKHAYSAN 19/07/1997

Markay daristay dhamaan Asbaabta sare ku xusan iyo qodobada 293, 294, 295XHM waxay soo saartay amarkan xayiraad ah

### **Xayiraada Maxkamada**

1. Maxkamada Gobolka M/Jeex Waxay xayiraysaa dhamaan guryaha hoos ku xusan oo ku yaala degmada gacan libaax badhtamaha suuqa hargeysa aaga masjid jaamaca weyn

A. :- Guriga lanberkiisu yahay GL/MX/T-17/147 Cabirkiisuna yahay 7.4X7. M jihooyinkiisuna kala yihiin sidan

Koonfur	Wado
Waqooyi	Dhisme
Barri	Dhisme
Galbeed	Dhisme

B. Guriga lanberkiisu yahay GL/MX/T-17/170  
Cabirkiisuna yahay 7.40X7.80 jihooyinkiisuna kala  
yihiin sidan

Koonfur	Dhisme
Waqooyi	Wado
Barri	Dhisme
Galbeed	Dhisme



C. Guriga lanberkiisu yahay GL/MX/T-17/169  
Cabirkiisuna yahay 4.10X7.75jihooyinkiisuna kala  
yihiin sidan

Koonfur	Dhisme
Waqooyi	Wado
Barri	Dhisme
Galbeed	Dhisme

D. Guriga lanberkiisu yahay GL/MX/T-17/168  
Cabirkiisuna yahay 3.90X7.85jihooyinkiisuna kala  
yihiin sidan

Koonfur	Dhisme
Waqooyi	Wado
Barri	Dhisme
Galbeed	Dhisme

E. Guriga lanberkiisu yahay GL/MX/T-17/168  
Cabirkiisuna yahay 3.90X7.85jihooyinkiisuna kala  
yihiin sidan

Koonfur	Dhisme
Waqooyi	Wado
Barri	Dhisme
Galbeed	Dhisme

2. Dhamaan guryahaas sare ku xusan maxkamadu way xayirtay lama iibin karo lamina rahmi karo lamina wareejin karo, lamina hibayn karo, waxna lagama badeli karo, taariikhda manta wixii ka danbeeya Ilaa amar danbe ka soo baxayo maxkamada gobolka m/jeex ee Hargeysa
3. Maxkamadu waxay faraysaa taliyaha Degmada Gacan Libaax in uu Sharciiga horkeeno cidii xayiraada jabisa ama ku xadgudubta
4. Xayiraadani waxay soo baxay manta oo taariikhdu tahay 31/05/2014

Yaxye Cali idiris  
Garsooraha Maxkamada Gobolka M/Jeex  
Hargeysa

Jamaal Maxamed Cumar  
Kaaliyaha Maxkamada Gobolka M/Jeex

**Jamhuuriyada  Somaliland**  
**Maxkamadda Degmada Hargeysa**

MDH/892 /2014 12/06/14

Ku: Idaacada Radio Hargeysa

Ku: Dhamaanba Warbaahinta Madax Banaan Ee Hargeysa

Ku: Garyaqaanka Guud Ee Qaranka J.S.L

**Ujeedo:- Baafinta Dacwaysane Ibraahin Sigad**  
**Miisaan**

Maxkamadda Degmadda Hargeysa Waxay  
Baafinaysaa Dacweysanaha Magaciisu kor ku  
Xusan yahay in uu Maxkamadda horteeda ku  
yimaado **45** Cisho Gudahood oo ka Bilaabmanta  
Marka laga Baahiyo idacadda iyo Warbaahinta  
Madax Banaan Ee Dalka

Dacwaysanaha oo Dacwad Madaniya u taalo  
Maxkamadda Degamadda Hargeysa

Haddii u ku iman waayo Mudada Maxkamadu u  
qabatay Dacwaysanaha Maxkamadu waxay  
dhageysan doontaa Dacwada isagoo Maqan sida  
waafaqsan Qod 204

Maxkamadu Waxay u Cuskatay Qodobka Sharci Ee  
121XHM.

C/raxmaan Maxamed mowliid  
Gudoomiyaha Maxkamada Degmada Hargeysa

Kaaliye: - Khadra Xasan Nuux



JAMHUURIYADA

SOMALILAND

MAXKAMADDA DEGMADA HARGEYSA

MDH/DML/624/2014

Date:-14/06/2014

Ku: Garyaqaanak Guud Ee Qaranka JSL

Ku: Jaraaidada Madaxa Banaan Ee Dalka

Ku: Ilaacada Raadyaw Hargeysa



**Uj:- Faafin Xukun**

**Maxkamada Dagmada Hargaysa**

Waxay halakan idinku soo gudbinaysa xukunka ay faafinayso kaas oo dacwaysanuhu ka baxsaday xukunkiisa

Magaca umada Soomaliland

Maxkamada Dagmada Hargaysa

Xukunkii Maxkamada

Maxkamada Dagmada Hargaysa

1- Waxay Baabiisay Heshiiskii ka guur ee u dhexeeyay dacwootad iyo dacwaysanaha iyadoo hal dalqad Oo baaino ah ka furtay Barkhad Cismaan Xuseen Xaaskiisa Ugbaad Cumar Maxamuud Maanta Oo ay taariikhdu tahay 14/6/2014

2- Xuquuqda Meherka Iyo cadad baxa iyo Masaariiftii Baaqatay Midna laguma xukumin dacwaysanaha maadoomo ay dacwootadu ka dhaaftay oo ay ku badalatay Dalqadeeda furniinka.

3- Xanaanada iyo Gacan ku haynta inanta yar ee ay isu leeyihiina waxay u xukuntay in hooyadeed gacanta ku hayso Masaariifteedana waxay ku xukuntay Aabaheed in uu bixiyo bishii walba 450,000 Afar Boqol Iyo Konton Kun Oo Shilin Oo



maalintii noqonaaya 15,000 Shan iyo toban kun oo shilin S/Land

4- Mudada cada baxu waa sadex daahir

5- Xukunka waxaa la soo saaray Maanta 14/6/2014

6- Xukunka waxa ka furan rafcaan Mudo 30 Maalmood ah Oo ka bilaabanta Maalinta uu qaato ama lagu baahiyo Joornaalka iyo Idaacada Iyo faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyada Somaliland

ALLAA MAHAD LEH

Sh.Xasan Qorane X. Cali

Garsooraha Maxkamada Degmada Hargeysa

Kaaliye:- Hodan Cabdalle Barre

**JAMHUURIYADDA**  **SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

XIG/JSL/92/2014.

01/06/2014

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

**Ujeedo:- Caddeyn Diiwan Gelin Shirkadeed**

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha dalka (Sole Proprietorship).

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Ogolaanshaha Wasaaradda Ganacsiga JSL ee WGM-AG-PCA-80/014.

Markuu arkay:- Xeerka Shirkada ku magacaaban SOMHORIZONE.

**Wuxuu Caddeynayaa.**

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkaddan ku Magacaaban SOMHORIZONE, shaqadeeduna tahay magaaladda Hargeisa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 01/06/2014

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

**JAMHUURIYADDA**  **SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**



Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaainta Guud ee Qaranka jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha;-

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay IVORY INTERNATIONAL, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu arkay:- In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka

11aad xubintiisa 3aad ee Xeer  
Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.



Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan  
Tahay Shirkadda Magaceedu yahay IVORY  
INTERNATIONAL, Astaanteeduna tahay (Goobo  
Xarafk I ku jirto) shaqadeeduna tahay addega la  
talinta farsama aqooneedka (ICT) xarunteeduna  
tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo  
ay taarikhdu tahay 02/06/2014

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

**JAMHUURIYADDA**  **SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/94/2014.


5/06/2014

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha;-



Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay BERBERAAWI COMPANY, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu arkay:- In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

### Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda Magaceedu yahay Berberaawi Company, Astaanteeduna tahay (Markab laba calan leh) shaqadeeduna Ganacsiga dhoofinta xabkaha iyo

fooxa (Export of gums and resins) xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 05/06/2014



Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

**JAMHUURIYADDA  SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

XIG/JSL/95/2014.

5/06/2014

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

**Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed**

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha;-

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay BYOUTH FUSION RE SOURCES, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu arkay: - In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

### Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda Magaceedu yahay Byouth Fusion Resources, Astaanteeduna tahay (Y iyo B isku dhex jira) shaqadeeduna tahay Ganacsi guud (General Trading) xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 05/06/2014

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka



XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

TIX:- XIG/JSL/99/2014.

14/06/2014

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska XeerIlaainta Guud ee Qaranka jamuuriyada Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha

**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay NUURS CONSTRUCTION COMPANY, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

**Markuu arkay:-** in ay saamiga Shirkaduu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .



Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda magaceedu yahay, **NUURS CONSTRUCTION COMPANY, Astaanteeduna tahay:-** goobo afar gees ah oo ay ku dhex yeelaan magaca shirkada iyo dhismayaaal), shaqadeedu tahay dhismaha (**Constraction**), xarnteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 14/06/2014

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka**

JAMHUURIYADDA  OMALILAND

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

TIX: - XIG/JSL/ /2014

14/06/2014

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

**Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed**

Xafiiska XeerIlaainta Guud ee Qaranka jamuuriyada Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, GIIREH GEMESTORE AND MINERAL COMPANY, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

**Markuu arkay:** - in ay saamiga Shirkaduu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay:** - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda ku magacaaban **GIIREH GEMESTONE AND MINERAL COMPANY, Astaanteeduna tahay:-** goobo uu ku dhex sawiran yahay mapka Africa oo ay laba qof dul taagan yihiin, shaqadeedu tahay Macdanta (**Mineral and Gemstones**), xaranteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 14/06/2014

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

TIX: - XIG/JSL/98/2014

15/06/2014

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska XeerIlaainta Guud ee Qaranka jamuuriyada Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, **TARTIIB GENERAL TRADING COMPANY**, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

**Markuu arkay:** - in ay saamiga Shirkaduu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay:** - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda ku magacaaban **TARTIIB GENERAL TRADING COMPANY, Astaanteeduna tahay:-** goobo iyo sax, shaqadeedu tahay soo dejin (**Import** ), xaranteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 15/06/2014

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka**

**JAMHUURIYADDA**



**SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

TIX: - XIG/JSL/02/2014

19/06/2014

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

**Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed**

Xafiiska XeerIlaainta Guud ee Qaranka jamuuriyada Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, MIISAAN HEALTHCARE COMPANY, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad

Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland  
company Law.

**Markuu arkay:** - in ay saamiga Shirkaduu waafaqsan  
yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer  
NO.25/2004 Company Act of  
Somaliland, saamiyadooduna ay  
sugan yihiin.

**Markuu arkay:** - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay  
saxeexeen sida uu qabo qodobka  
11aad xubintiisa 3aad ee Xeer  
Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay  
Shirkadda ku magaceedu yahay, **MIISAN HEATHCARE  
COMPANY, Astaanteeduna tahay, ( waa Magaca  
Shirkada oo goobo ku jira kuna dhexjiraan suulyar oo  
dhiig laga qaadayo),** shaqadeedu tahay Keenidta  
Dawooyinka iyo Qalabka Shaybaadhka ( **Miporter  
medical Drug**), xaranteeduna tahay Magaalada Hargeysa,  
laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 19/06/2014

Allaa Mahad Leh.

**(Aadan Axmed Muuse)**

**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka**

**JAMHUURIYADDA**



**SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

TIX: - XIG/JSL/02B/2014

19/06/2014

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeeddo:- Caddeyn Diiwaan Galin Shirkadeed

Xafiiska XeerIlaainta Guud ee Jamuuriyada Somaliland oo uu xil saaray diiwaan Gelinta Shirkadaha dalka.

**Markuu arkay:** - Qodobka 502aad ee Xeerka Madaniga.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkad ku magacaaban CTG GLOBAL LIMITED (CTG).

**Markuu arkay:** - Saxeexa Saamiliyeda Shirkaddu ay saxeexeen.

Wuxuu Caddeynayaa.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan tahay Shirkadda ku magacaaban **CTG GLOBAL LIMITED (CTG)** , shaqadeedu tahay adeega la dhinaca maamulka iyo gadiidsiinta ( Human resource Managment Service, M & E , Logistics), xarnteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 19/06/2014

Allaa Mahad Leh.

**(Adan Axmed Muuse)**

**K/S/Xeer Ilaaliya Guud ee Qaranka JSL**